



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

Waxaan shaacinaya maamulaha cusub ee Dugsiga Harrison Park, Leah Dickey

Maayo 2018

Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiga Harrison Park,

Fadlan igala qeybqaata soo dhaweynta Leah Dickey oo noqoneysa maamulaha cusub ee Dugsiga Harrison Park K-8.

Intiina badani aqoon ayaad u leedihiin Leah, waxa ay maamulaha-xigeenka ka soo ahayd ilaa sanadkii 2014 Dugsiga Harrison Park, iyada oo aad u taqaanaa dhaqanada kala gedisan ee bulshadeena gaarka ahi leedahay. Waa shaqsi aad u hanweyn taasi oo xirfadeeda aqoonyahanimo ay ka go'an tahay sidii ay dhisi lahayd xiriirka ardayda, waalidiinta iyo shaqaalaha iskuulkaba.

Mudadii ay maamulaha-xigeenka iskuulka Harrison Park ay ahayd Leah waxa ay addeegsatay khibaradeedii ay kor ugu qaadeysay ardeyda sidii ay u noqon lahaayeen kuwa guuleysta, waxa ay dejisay qaabka hore loogu ogaanayo baahida ardayda, xog ururin ku salaysan macluumaad dhab ah oo lagu go'aan qaadanayo, ka qeybgalka bulshada iyo waxbarasho loo siman yahay.

Waxa ay meelmarisay barnaamijka wax lagaga qabanayo akhriska iyo iyada oo madax ka ahayd Waxbarashada Gaarka ah)SPed), AVID, kooxaha Dugsiga

Dhexe iyo Cimilada. Waxa ay ka soo shaqeysay sidii ay u tababari lahayd kooxo leh dhaqano kala gedisan oo noqonaya macalimiin Kulliyada Warner Pacific, iyada oo masuulka ka ahayd sidii jadwalka loogu sameynayo dhismo ay ku jiraan dad tiradoodu dhan tahay 700 qof.

Leah waxa ay ka bilowday waayo-aragnimadeeda waxbarasho macalinimo Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS), iyada oo bare ka ahayd Dugsiga Dhexe ee West Sylvan fasalada lixaad iyo sideedaad. Waxa ay haddana bare ka noqotay sanadihii 2003 ilaa 2014 Dugsiga Dhexe ee Reynolds,halkaasi oo ay dhigi jirtay fasalada todobaad iyo sideedaad maadadda Luqada Ingiriiska, sidoo kale waxay noqotay xiriiriyyaha Ardayda Hibada iyo Xirfada Dabiiciga ah leh(TAG).

Leah, waxa ay ka soo qalin jabisay Jaamacada Gobolka Portland)PSU), halkaasi oo ay ka qaadatay shahaadadda heirka koowaad kuna baratay Sayniska Bulshada ee Xiriirka Khudbadaha, qeybta kalena ku qaadatay Qoraalka Xirfadlayaasha. Waxa sidoo kale shahaadadda heirka labaad ku qaadatay Culluunta Manhajka iyo Casharada iyada oo ka qaadatay Jaamacada Lesley, waxa kale oo shahaadada sida wax loo dhigo ka qaadatay Warner Pacific iyo shahaadadda maamulka oo ay ka qaadatay Jaamacada Lewis & Clark.

Waqtiyadeeda firaaqada ah Leah, waxa ay siisaa saygeeda iyo labadeeda caruura, socdaalka iyo daawashada ciyaarka baseball-ka.

Fadlan igala qeybqaata sidii aan ugu mahadcelin lahayn Maamule Dickey.

Guadalupe Guerrero, Guddoomiyyaha Waxbarashada



Leah Dickey

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.